

Qorshaha Aragtiyeed ee PPS wuxuu gelayaan weji xiiso leh, oo ah meel aan xiriir la sameyno wax daneeyayaasha ‘stakeholders’ ka socda guud ahaan bulshada dugsigeena ee firfircoon isla markaana kala duwan.

Janaayo waxay astaan u tahay bilowga tiro kulamada bulshada ah halkaasi oo ardayda, qoysaska, macallimiinta iyo tabarucaaysha PPS ay awoodi doonaan in ay dadka la wadaagaan waxay u maleynayaan in mustaqbal waxbarashada ee Portland ay tahay in uu u ekaado.

Kulamadani, waxaan ka qayb qaatayaasha marin doonaa layliyo ‘exercises’ kuwaasi oo mustaqbalka diiradda lagu saarayo, si loo maqlo fikradaha ugu wanaagsan iyo riyooinka PPS ee sida wanaagsan ugu adeegaya ardayda mustaqbalka.

Kulanka ugu ballaaran ee bishani wuxuu dhici doonaa **Janaayo 26 isaga oo ka dhici doona Dugsiga Sare ee Madison 1:00-5:00**. Kulankan waxaa ku jiri doona fursado badan iyo siyaabo loogu talagalay ka qayb galayaasha in ay uga qayb qaataan. Tani waxay noqon doontaa mid madadaalo leh, dhacdo macluumaaad la isku dhaafsanayo waxaan jeelaan lahayn in aad nagu soo biirto, haddii aad haysato waqtii dhan 30 daqiiqo ama galabnimada oo dhan si aad noola qaadato. Cabitaan fudud, cunto fudud iyo daryeel carruureed iyo turjubaano ayaa la bixin doonaa.

Waxaan si gaar ah u daneynaynaa in aan war ka maqalno dadka iyo kooxaha aan taariikh ahaan helin wax qorshe ah. Iyada oo lala shaqeynayo dugsiyadeena, kooxaheena waalidiinta, ururadeena bulshada ku saleysan iyo kuwa kale, rajadayadu waa in aan gaarno isla markaana war ka maqalno, dhageystayaasha ugu ballaaran, kala duwan ee daneeyayaasha PPS ee suurtagalka ah. Cod kasta, aragti kasta, RIYO kasta waa mid muhiim u ah Aragtida PPS taasi oo tixgelinaysa, sharfaysa isla markaana si buuxda ugu adeegaysa dhammaan ardayda dhigata dugsiyada oo idil.

Waxaanu jeelaan lahayn in aanu kugu aragno mid ama ka badan oo ah kulamadeena dhacdooyinka bulshada!

Wixii macluumaaad dheeraad ah ee ku saabsan qorshaha Aragtiyeed ee PPS, **fadlan riix halkan.**